King County

QORSHE HAWLEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE CIMILADA DEGMADA KING EE 2025

NUXURKA KOOBAN



QORSHE HAWLEEDKA ISTIRAATIIJIGA AH EE CIMILADA DEGMADA KING EE 2025

NUXURKA KOOBAN

Degmada King oo dadkeedu ay ka badan yihiin 2 milyan, waa degmada ugu weyn gobolka Washington, waxayna muhiim u tahay qaabeynta mustaqbal caafimaadqab leh, la joogteyn karo ee gobolka oo dhan. Degmadu waxay leedahay ballanqaad soojireen ah oo ku aaddan hoggaan cimilo aan libiqsan, iyadoo dejisay siyaasado iyo bartilmaameedyo ay hiigsanayso si ay u dhinto qiiqa ka soo baxa guri cagaarka *greenhouse gas* (GHG) iyo dhisida bulshooyin cimilada u adkeysta. Inkasta oo uu jiro tobanaan sano oo waxqabad ah, haddana qiiqa GHG ee Degmada King ayaa boqolkiiba 4 ka sarreeya tii 2007, inkasta oo boqolkiiba 8 uu ka hooseeyo kii ugu sarreeyay 2019. Arrintan ayaa muujinaysa xoogaa horumar ah, laakiin kuma filna.

Yareynta qiiqa soo baxaya kaliya ma ahan yool siyaasadeed, laakiin waa wax sax ah in la sameeyo oo dhaqan ahaanna lagama maarmaan ah. Dadka guud ahaan gobolka waxaa ay la kulmayaan dhacdooyin cimilo rikoorka jebiyay oo soo noqnoqda sida mawjadaha kuleylka iyo dabka ka kaca kaymaha. Dhacdooyinkan waxaa ay haliso daran oo sii kordhaya ku hayaan kaabayaasha dhaqaalaha, caafimaadka guud, iyo hab-dhis degaannada, gaar ahaan bulshooyinka safka hore. Yareynta qiiqa baxaya waxaa ay aasaasi u tahay tartiibinta isbeddelka cimilada iyo ka fogaanshaha cawaaqib-xumada ugu daran ee uu ku yeesho caafimaadka, dhaqaalaha, iyo deegaanka.

Wax-ka-qabashada isbeddelka cimilada waxaa ay u baahan tahay kordhinta baaxadda iyo xawaaraha waxqabadka iyadoo la xoojinayo iskaashiga guud ahaan dhammaan heerarka dowladda. Degmada King waxay door hoggaamineed oo muhiim ah ka qaadataa xaqiijinta in bulshooyinka guud ahaan gobolka ay ka faa'iidaan maalgalinnada iyo siyaasadaha cimilada oo aad u mideysan, oo xooggan. Qorshe Hawleedka Istiraatiijiga ah ee Cimilada (SCAP) waxaa uu qeexayaa sida ay Degmadu u dhimi karto qiiqa baxaya ee GHG, diiradda u saari karto bulshooyinka safka hore, iyo sida ay ugu diyaar-garoobi karto saameynta isbeddelka cimilada.

QORSHAHA DEGMADA KING: WAXQABADKA AAN LIBIQSAN EE MUSTAQBALKA LA JOOGTEYN KARO

Qorshe Hawleedka SCAP waa qorshaha roadmap-ka shanta-sano ee Degmada King si wax looga qabto isbeddelka cimilada, iyadoo saddex qaybood la cusboonaysiinayo: Dhimista Qiiqa Ka-soo-baxa Guri Cagaarka Greenhouse Gas, Bulshooyinka Safka Hore oo Adkeysi leh oo La-joogteyn Karo, iyo U-diyaar-garowga Isbeddelka Cimilada. Tan iyo markii la bilaabay sanadkii 2012, Qorshey Hawleedka SCAP ee Degmada King wuxuu horseeday horumar mug leh in laga gaaro qaadashada tamar nadiif ah, gaadiid la joogteyn karo, dib-u-soo-nooleynta hab-dhis deegaanka, iyo xallal ay bulshadu-wado.

Qorshe hawleedka SCAP ee 2025 waxaa ka mid ah shan qaybood, sagaal dadaal oo ugu muhiimsan, 25 goobood oo diiradda la saarayo, 178 waxqabadyo, iyo 65 tallaabooyin waxqabad oo loogu talagalay dhisidda mustaqbal la joogteyn karo, loo siman yahay oo adkeysi u leh dhammaan.

Natiijooyinka Dadaallada Muhiimka ah

Dadaallada ugu muhiimsan Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 waxaa ay metelaan mudnaanaha cimillada Degmada King ee aadka u muuqda oo ayna bulshada wado. Hawlaha isku-xirka guud ahaan saddex qaybood ee udub-dhexaadka u ah qorshe hawleedka SCAP–si loo ballaariyo, yoolasha ay natiijadu wado ee sii wanaajiya nolosha dadka deggan Degmada King. Habkan wuxuu xaqiijinayaa in hawsha cimilada la dhexgeliyo nidaamyada gaadiidka, guryeynta, cuntada, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo horumarinta dhaqaalaha, oo ay ka faa'iidayaan dhammaan dadka deggan, gaar ahaan kuwa uu aadka u taabtey isbeddelka cimilada.

Natiijooyinkan dadaallada muhiimka ah ee soo socda ayaa ka dhigan xallalka cimilada ee hubiya shaqada Degmada King in ay tahay mid ay bulshadu wado, loo siman yahay, oo loo dhisay in ay waarto:

1. **Mudnaanta Koowaad Sii Bulshooyinka Safka Hore:** Maalgelinta hoggaanka, ballaarinta kheyraad helidda, iyo hubinta siyaasadaha cimilada ayaa lala nakhshadeeyay oo loogu talagalay bulshooyinka safka hore.

2. **Dhismeyaal Ammaan ah, Caafimaadqab leh, oo Cimilada-u-Diyaarsan:** Xoojinta guryeynta iyo goobaha shaqada si ay ugu adkeystaan kuleylka aadka ah, qiiqa dabka keymaha, iyo fatahaadaha iyadoo la xaqiijinayo awoodista iyo ka hortagga barakaca.

3. **Gaadiid Isku-Xiran oo La Gaari Karo:** Ballaarinta ikhtiyaarada dhaqdhaqaaqa ee la joogteyn karo sida gaadiidka dadweynaha, baaskiil wadashada iyo lugeynta si loo yareeyo gaari ku tiirsanaan iyo si loo sii wanaajiyo tagidda shaqooyinka, iskuullada, iyo goobaha adeegyada.

4. **Dhaqdhaqaaqa Dhaqaale iyo Fursado Shaqo:** Hubinta in kala-guurka tamarta nadiifka ah ay abuurto fursado dhaqaale, gaar ahaan loogu talagalay bulshooyinka iyo shaqaalaha taariikh ahaan loo diiday.

5. **Cuntada Degaanka, Cusub oo loogu talagalay Qof Walba:** Xoojinta haqab-beelka cuntada iyo beero la joogteyn karo iyada oo la taageerayo beeraleyda, la yareynayo cunto beerdareynta, iyo kordhinta helidda cunto caafimaadqab leh, oo cusub.

6. **Dhimista Wasakhda:** Dhimista isticmaalka, ka hortagga wasakhda, iyo dib-u-adeegsiga agabka qiimaha leh.

7. **Hawo Nadiif ah, Biyo, iyo Hab-dhis Degaan oo Caafimaadqab leh:** Ilaalinta iyo dib u soo nooleynta keymaha, biyo mareennada, iyo goobaha cagaaran si loo sii wanaajiyo caafimaadka dadweynaha, kala duwanaanshaha noolaha, iyo u adkeysiga cimilada.

8. **Kaabayaasha Dhaqaalaha La Isku-halleyn Karo oo Mustaqbalka-u-Diyaarsan:** Casriyeynta waddooyinka, biyaha, korontada, gaaska, iyo adeegyada guud si ay ugu adkeystaan cimilada xad-dhaafka ah iyadoo la xaqiijinayo helidda loo siman yahay ee kaabayaasha aasaasiga ah.

9. **Hoggaamin Wadareed iyo Xalal Ay Bulshadu Wado:** In sinnaanta la dhexgeliyo maamulka cimilada iyadoo la xaqiijinayo in bulshooyinka safka hore, Qabiillada, iyo ururrada degaanka ay gacan ka geystaan qaabeynta iyo horseedidda xalal cimilo.

Cusboonaysiinta Qaybta: Qaybta Dhimista Qiiqa Ka-soo-baxa Guri Cagaarka Greenhouse Gas

Shaxaha qorshe hawleedka SCAP ee 2025 dhabbe ku aaddan sii wadista dhimista qiiqa ka-soo-baxa guri cagaarka ee greenhouse gas. Ilaha qiiqa ka soo baxa ee ugu weyn waa qiiqa dhismayaasha iyo gaadiidka, waxaanna ku xiga wax-ku-biirrinta yaryar: gaasaska qaboojiyeyasha, isticmaalka dhulka, wasakhda adag, iyo biyaha wasakhda ah. Iyadoo heerarka qiiqa baxaya ee 2007 loo adeegsanayo sida heerka bilowga, ayay Degmada King waxaa ay dooneysaa in ay ciribtirto ilaha degmada oo dhan ee qiiqa baxaya ee GHG ee 25ka sano ee soo socda. Qorshe Hawleedka SCAP ayaa ku baaqaya dhimis boqolkiiba 50 ah marka la gaaro 2030, boqolkiiba 75 marka la gaaro 2040, iyo boqolkiiba 95 ilaa 100 (ama eber-saafi ah) marka la gaaro 2050.

Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 wuxuu qeexayaa qorshayaasha lagu la shaqeynayo bah-wadaagta iyo bulshooyinka shanta sano ee soo socota si loo sameeyo waxyaabahan soo socda:

- **Tusaale ku hoggaami**, u-qareemeynta siyaasadaha qiiqa baxaya ee GHG oo xooggan, muujinta hoggaaminta degaanka, iyo xoojinta isla-xisaabtanka hawlgallada Degmada gudaheeda ah.
- **Dardargeli xalalka tamarta nadiifka ah iyo qiiqa baxaya ee eberka ah** iyada oo la adeegsanayo dhismayaasha cagaarka ah ee waxqabadka sare leh, barnaamijyada tamarta hufan, iyo u guurista kaabayaal iyo gaadiid aan lahayn qiiq ka soo baxaya.
- **Ballaari helidda gaadiid la isku-halleyn karo** iyada oo la sii wanaajinayo gaadiidka dadweynaha, taageeridda dhaqdhaqaaqa firfircoon, iyo dhimista qiiqa ka soo baxaya gaadiidka.
- **Yaree wasakhda iyadoo la adeegsanayao dhaqaale wareegga** oo diiradda saaraya dib-u-adeegsi, dib-u-helid, iyo isticmaal ay mas'uuliyad ku dheehan tahay.

- **Ilaalinta dhulalka dabiiciga ah** iyo u diyaarinta kaabayaasha mustaqbalka taageeridda hawlaha beeraha iyo keymaha oo qabta kaarboonta iyo dhisidda kaabayaasha guud oo la tacaamuli kara saameynta cimillada isla-markaanna si siman ugu adeegga bulshooyinka oo dhan.

Saadaasha Mustaqbalka
Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 wuxuu ku dhisan yahay dhaxalka waxqabadka cimillada ee Degmada King. Si kastaba ha ahaatee, si loogu guuleysto yareynta kaarboonta ee mugga leh, waxqabadka cimillada waa in la dhexgeliyaa guud ahaan heerarka federaalka, gobolka, iyo degaanka. Hirgelinta tallaabooyinka lagu dhimayo qiiqa gobolka iyo federaalka ee jira iyo kuwo lagu soo-jeediyay qorshe hawleedka SCAP ee 2025 ayaa kaliya la filayaa in ay ka dhashaan dhimista qiiqa oo boqolkiiba 33 ah marka la gaaro 2030. Dhimistan ayaa ka hooseysa bartimaameedyada boqolkiiba 50 ah, oo muujinaysa baahida loo qabo in iskaashi dheeraad ah laga hirgeliyo guud ahaan dhammaan heerarka dowladda. Dowlad goboleed ahaan, Degmada King waxay si toos ah u hirgelin kartaa hawlaha cimilada oo loo marayo adeegyada waxayna door muhiim ah ka qaadataa isku-keenidda bah-wadaagta degaanka si loogu qareemeeyo waxqabadyada gobolka iyo federaalka oo xooggan.

Cusboonaysiinta Qaybta: Qaybta Bulshooyinka Safka Hore oo La Joogteyn Karo Adkeysina Leh

Isbeddelka cimilada si siman uma saameeyo dhammaan bulshooyinka. Bulshooyinka safka hore—Madowga, Asaliga, iyo Dadka Midabka Leh (BIPOC), soo-galootiga iyo dadka qaxootiga ah, dadka deggan ee dakhligooda hooseeya, shakhsiyaadka leh xaalado caafimaad oo horey u jiray, dadka aan hoyga haysan, iyo shaqaalaha meelaha bannaanka ah ka shaqeeya—ayaa la kulmo saameynta cimilada ee ugu horreysa, ugu daran, ee waarta. Bulshooyinkan waxaa ay u badan tahay in ay ku noolaadaan goobo fatahaadda u nugul, xaafado geedaha ka baxa ay yar yihiin, ama meelo u dhow waddooyinka waaweyn oo heerarka wasakhowgu ay ku badan yihiin, oo halis badan u gelinaysa halista kulaylka aadka ama xad-dhaafka ah, tayada hawada oo liidata, iyo barakaca sababta u ah musiibooyinka cimilada.

Caqabadahan ay cimiladu horseedo ayaa sii xumeeya caafimaadka jira, kala duwanaanshaha dhaqaalaha iyo bulshada, oo muhiim ka dhigeysa in mudnaanta la siiiyo maalgashiyada u adkeysiga cimilada, horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha, iyo xalalka ay bulshadu wado ee ilaaliya kuwa halista badan ku jira.

Hoggaaminta ay Bulshadu Wado iyo Siyaasad-dejinta
Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 ayaa ka tarjumaysa mudnaanaha bulshada ee siyaasad-dejinta iyo hoggaaminta hawsha cimilada. Meelaha diiradda lagu saarayo ee muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- **Sugidda guryeynta iyo dadaallada looga hortagayo barakaca** oo xaqiijinaya in maalgelinta u adkeysiga cimilada aysan barakicinin dadka deggan iyada oo la ballaarinayo guryeyn la awoodi karo, ilaalinta kireystayaasha, iyo hubinta helidda loo dhan yahay ee sare u qaadidda guriga tamarta u hufan.
- **Helidda la ballaariyay ee gaadiidka dadweynaha** iyo ikhtiyaaro dhaqdhaqaaq kaarboonka hooseeya, la woodi karo oo loogu talagalay bulshooyinka oo dhan.
- Tallaabooyinka **cadaaladda tamarta iyo awoodidda korontada, gaaska iyo biyaha** ayaa yareeya culeysyada tamarta ee qoysaska dakhligoodu hooseeya, ka guuridda shidaalka foosilka, iyo ballaarinta xalalka tamarta nadiifka ah.
- Dadaallada **horumarinta cududda shaqaalaha ee cagaaran** ayaa gacan ka geysta abuurista shaqooyin, tababbar, iyo fursado dhaqaale, gaar ahaan bulshooyinka safka hore iyo shaqaalaha taariikh ahaan laga reebay.
- **Xoojinta haqab-beelka cuntada iyo beero la joogteyn karo** ayaa xoojineya nidaamyada cuntada iyada oo la taageerayo beeraleyda degaanka, la yareynayo cunto beerdareynta, iyo kordhinta helidda cunto caafimaadqab leh, oo cusub oo ay helaan bulshooyinka safka hore.

Saadaasha Mustaqbalka
Degmada King waxaa ka go'an horumarinta xalalka cimilada ee wax-ku-oolka ah loona siman yahay. Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 ayaa ka tarjumaya ballanqaadkan isaga oo mudnaanta siinaya istiraatiijiyadaha ay bulshadu wado, maalgelinta u adkeysiga cimilada, iyo xaqiijinta in bulshooyinka safka hore ay safka hore ka galaan go'aan-qaadashada. Kani waa aasaaska mustaqbalka dhammaan dadka deggan ay heli karaan hawo nadiif ah, guryeyn

ammaan ah, gaadiid la isku-halleyn karo, iyo fursado dhaqaale oo loo maro isbeddelka cimilada. Dhabbaha hore wuxuu u baahan yahay wada shaqayn joogto ah, maalgashi aan libiqsan, iyo siyaasado xudun u ah codadka kuwa aadka u saameeyay. Degmada King oo adkeysi leh waa mid bulshooyinka safka hore aan kaliya laga ilaalin isbedelka cimilada, laakiin ay u horseedayso dariiq caafimaadqab leh, mustaqbal dadka oo dhan u wanaagsan.

Cusboonaysiinta Qaybta: U-diyaar-garowga Cimilada

Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 wuxuu dejinayaa bartilmaameedyo cusub oo wax looga qabanayo u-diyaar-garowga cimilada. Isbeddelka cimilada ayaa durba saameynaya Degmada King, saaxadeeda ayaanna sii kordheysa. Gobolka ayaa la kulmaya dhacdooyin cimilo-gooreed aad u daran oo soo noqnoqda, kuwaas oo haliso daran ku haya bulshada, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo hab-dhisyada degaanka. Marka halisaha cimilada sida dhacdooyinka kulaylka aadka ah, fatahaadaha, dabka keymaha ka kaca iyo sare u kaca heerka badda, Degmada King ayaa ka shaqeynaysa istiraatiijiyadaha ilaalinta degganayaasha, ganacsiyada, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo kheyraadyada dabiiciga ah si loo xaqiijiyo in bulshooyinka ay ugu diyaar-garoobaan caqabadaha.

Si loo yareeyo halisaha oo kor loogu qaado u adkeysiga cimilada, Qaybta U-diyaar-garowga Cimilada ee Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 waxaa ka mid ah goobahan soo socda ee diiradda la saarayo shanta sano ee soo socota:

- **Ka Caawinta dadka iyo bulshooyinka in ay bedqabaan oo ay caafimaadqabaan markay la tacaalayaan isbeddelka cimilada** iyadoo la yareynayo halisaha ka imaanaya fatahaadaha, sare u kaca heerka badda, kulaylka aadka ah iyo dabka keymaha ka kaca; ballaarinta bulshada in ay hesho goobo qabow iyo qalabka ka hortagga fatahaadda; taageeridda istiraatiijiyadaha u adkeysiga dabka keymaha iyo kulaylka oo ay bulshadu hormuud ka tahay; sii wanaajinta ilaalinta kaabayaasha dhaqaalaha ee miyiga; iyo kor-u-qaadista la socoshada caafimaadka dadweynaha si loogaga jawaabo sida hadda si ka wanaagsan halisaha caafimaadka ee cimilada la xiriira.
- **Dhisidda kaabayaal dhaqaale oo adkeysi leh** iyadoo halisaha cimilada, sida fatahaadaha iyo cimilo-gooreedda aadka ah, lagu darayo sida ay Degmadu u nakh-shadeyso, u dhisto oo kor ugu qaado mashaariicda waaweyn. Tani waxaa ka mid ah ilaalinta fatahaadda, nidaamyada biyaha duufaanka, xarumaha biyaha wasakhda ah, iyo kaabayaasha gaadiidka Metro-ga. Jaangooyooyinka cusub iyo qalabka qorsheynta ayaa gacan ka geysanaya hubinta maalgashiga dadweynaha in loo dhiso qaab ay ku waaraan iyadoo uu jiro isbeddelka cimilada.
- **Hirgeli xalal dheefo-badan leh,** oo ay ku jiraan ballaarinta kaabayaasha cagaaran sida beeraha biyaha duufaanka, jardiimada roobka, iyo geedaha waddada, si loo maareeyo fatahaadaha, kor-u-qaadista tayada biyaha, iyo abuurista bulshooyin caafimaadqab leh. Waxa muhiimka ah ee diiradda la saarayo waxaa uu noqon doonnaa geedaha magaalooyinka lagu beero guud ahaan dhulka maamulka si loo yareeyo kulaylka oo loo taageero noolaanshaha, iyadoo sidoo kale la dedejinayo isticmaalka biyaha dib loo warshadeeyay iyo xalalka dabeecadda ku saleysan ee loogu talagalay dib-u-noolaynta deegaanka dabiiciga ah iyo adkeysiga beeraha.
- **Kordhinta adeyiga habdhis degaanka** iyadoo dib loo soo noolaynayo lana maareynayo keymaha, xariiq badeedka, iyo deegaanka dabiiciga ah iyadoo maanka lagu hayo isbeddel cimilada. Dadaallada waxaa ka mid ah dardargelinta dib u noolaynta keymaha dhulka guud, ballaarinta keenista geedo naqan oo cimilada la qabsadey, beerista geedo badan, iyo taageeridda milkiilayaasha dhulka gaarka loo leeyahay iyo adeegsiga hab-dhaqannada ugu wanaagsan. Degmada ayaa sidoo kale sii wanaajinaysa xaaladaha haraha si loo soo celiyo kalluunka iyo khariidadeynta deegaanka dabiiciga ah ee ay ku nool yihiin duur-joogta si mustaqbalka loo ilaaliyo sinjiyada nugul.
- **Xoojinta iskaashiga, aqoonta, iyo nidaamyada loogu talagalay adkeysiga mustaqbalka fog**, oo ay ka mid tahay la shaqeynta dadka bah-wadaagta degaanka, gobolka, iyo qabiilka si loogu diyaar-garoobo saameynta cimilada sida sare u kaca heerka badda, abaarta, fatahaadda, iyo kulaylka aadka ah. Tani waxaa ka mid ah diyaarinta

istiraatiijiyado la wadaago oo loogu talagalay goobaha halista sare sida Dooxada Duwamish iyo taageeridda qorsheynta cimilada ku saleysan ee guud ahaan mashaariicda xariiq-badeedka iyo mashaariicda waaweyn.

Saadaasha Mustaqbalka

Degmada King waxaa ka go'an dhisidda mustaqbal ay bulshooyinka, kaabayaasha iyo kheyraadyada dabiiciga ah ay u adkeystaan isbeddelka cimilada. Qorshe Hawleedka SCAP ee 2025 wuxuu xoojiyaa dadaalladan isaga oo ballaarinaya maalgalinnada u-diyaar-garowga cimilada, kaabayaasha cagaarka ah, iyo barnaamijyada u adkeysiga ee ay bulshadu wado. U qorsheysiga saameynta cimilada kaliya kuma saabsana dhimista halisaha, laakiin waxay sidoo kale ku saabsan tahay hubinta bedqabka muddada-dheer, xasiloonida, iyo wanaagga dadka deggan Degmada King iyo dhaqaalaha. Maalgelinta u adkeysiga cimilada ayaa hadda yareyn doonna kharashaadka mustaqbalka wuxuunna abuuri doonnaa gobol caafimaadqab leh, oo qof walba ku noolaan karo. Iyadoo la adeegsanayo siyaasado xooggan, iskaashiyo, iyo xalal dhulka laga heli karo, Degmada waxaa ay sii wadi doontaa dadaallo horseed leh oo dadka iyo meelaha looga ilaalinayo halisaha isa soo taraya ee isbeddelka cimilada.

TALLAABOOYINKA WAXQABADKA

Degmada King ayaa adeegsan doonta xog lagu sii wadayo waxqabadka oo la iskula xisaabtamo. Qorshe Hawleedka SCAP waxaa ka mid ah tallaabooyinka Waxqabadka ee la cusboonaysiiyay ee la socda horumarka ku aaddan yoolasha yareynta GHG, sinnaanta, iyo u-diyaar-garowga cimilada. Muujiyayaashan waxaa ay gacan ka geysanayaan aqoonsiga waxa shaqeeya, halka loo baahan yahay hagaajinnada in laga sameeyo, iyo sida loo hubiyo in istiraatiijiyadaha cimilada ay u keenaan natiijooyin dhab ah bulshooyinka gobolka oo dhan.

WAX BADAN KA OGOW

Habka ay Degmada King u wajahdo hawsha cimilada ayaa mudnaansiinaysa horumarinta joogtada ah ee qorsheyaasha, barnaamijyada, iyo waxqabadyada. Tani ayaa u baahan ka-qaybgelinta joogtada ah ee bulshada iyo wax-ka-qabashada ku lugta leh sayniska cimilada iyo ilaha qiiqa ka soo baxa, iyo sidoo kale Warbixin Labadii Sanaba mar la soo saaro si loogu saleeyo cusboonaysiinta shan-sano kasta lagu sameeyo qorshaha SCAP.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dadaallada cimilada ee Degmada King, fadlan booqo www.kingcounty.gov/climate.

Si aad ula socoto wixii ku soo kordha hawsha cimilada Degmada King, fadlan warsidaha ka rukumo: bit.ly/kcclimatenews